

# Sameynta Go'aanada Ka qayb qaadashada Imtixaanka Gobolka: Tilmaamaha Wada hadalka Kooxda IEP

## Waa maxay sababta ay ardayda qabta naafanimadu ay tahay in ay uga qayb qaataan imtixaanka Gobolka?

- Waxay u saamaxdaa carruurta in ay tusaan waxay ay yaqaanaan ama ay sameynayeen.
- Waxaa lagu ogaadaa meelaha ay barnaamijyadu xoogan yihiin ee ay dhici karto in wax shabaha la sameeyo, iyo sidoo kale dhinacyada waxbarashada iyo meelaha looga baahan yahay maalgelin dheeraad ah si loo taageero ardayda qabta naafanimada.

## Waa maxay fursadaha imtixaanku?

- **Qiimeynta Guud:** Inta badan ardayda qabta naafanimadu waxay qaataan qiimeyn guud, iyada oo ay jiraan ama aysan jirin qorshayaal la sii dejiyay.
- **Qiimeynta Beddelka ah**: Ardayda yar ee qabta naafanimada dhanka garashada ah oo la taaban karo waxay qaataan Qiimeynta La Ballaariyay ee Oregon, oo ah qiimeyn beddel ah oo ku saleysan heerarka guul gaarida tacliimeed oo kale. Waxaa jira saameyn muddo gaaban iyo muddo dheer oo uu leeyahay ardayda ka qayb qaadata Qiimeynta La Ballaariyay ee Oregon markaa waa in go'aanada ka qayb qaadashada loo sameeyaa si taxaddar leh.

## Waa maxay saameynta ka qayb qaadashadu u leedahay Qiimeynta Beddelka ah?

- Saameyna muddada gaabani waa in waxbarashada ardayda qaadata Qiimeynta La Ballaariyay ee Oregon wuxuu noqon doonaa mid leh qoto dheeri, baaxad, iyo adkaansho ka yar kan ardayda kale.

OREGON DEPARTMENT OF EDUCATION
*Oregon achieves . . . together!*

## Ma ogeyd?

Natiijooyinka imtixaanka gobolka la'aantood, **in ay jiri karto halis ah in waxyaabaha laga filayo waxbarashadu uu hoos u dhici karo**, taasi oo keeni karta:

- waxbarasho aan adkayn;
- horumarka tacliimeed oo yaraada;
- fursadaha dugsiga sare ka dib oo xaddidan; iyo
- la'aanta macluumaadka waxbarasho oo lagu kalsoonaan karo oo loogu talagalay ardayda iyo qoysaska.

**Waxaa jira siyaabo lagu taageero oo awood loo siiyo ardayda qabta naafanimada marka ay ka qayb qaataan imtixaanadka.**

Qaababka helitaanka iyo qorshayaal la sii dejiyay ayaa ardayda ka caawin kara in ay tusaan waxay ay yaqaanaan ama ay sameyn karaan ee ku saabsan imtixaanaadka.

- Saameynta muddada dheer waa in ardayda qaadata Qiimeynta La Ballaariyay ee Oregon ay dhici karto in aysan ku taagnaan jidkii ay ku buuxin lahaayeen shuruudaha loogu talagalay shahaadada caadiga ah, ama ay dhici karto inay u qalmaan qaar ka mid ah machadyada waxbarashada dugsiga sare ka dib, adeega ciidanka, ama shaqooyin.

## Sidee bay tahay in natiijooyinka imtixaanka gobolka loo isticmaalo?

- Natiijooyinka **imtixaanka** gobolku waa kuwo lagu kalsoonaan karo oo gaarsiisan heerka kooxda arday ahaaneed. Qiimeynta ardayga gaar ahaaneen iyo helitaanka fursado waxbarasho (sida dariiqooyin xisaabeed oo adag, Meelaynta Horumarsan, Shahaadada Caalamiga ah, ama barnaamijyada dadka Xirfadda iyo Hibada leh) waa in ay noqdaan kuwo ku saleysan **ilo badan oo caddeyn ah**.
- Isticmaalka natiijooyinka imtixaanka gobolka oo ay weheliyaan xogta kale ee degaanka si ay u yeeshaan wada hadalo macno leh oo ku saabsan waxbarashada. Natiijooyinka imtixaanku **waa in aanan loo isticmaalin dejinta hadafyada macallinka ee gaarka ama ardayga** iyada oo qayb ka ah nidaamka qiimeynta macallinka.

## Maxaa looga baahan yahay ardayga in uu si macno u helo imtixaanka?

- [Buuga Helitaanka ee Oregon] ayaa sharraxaya helitaanka taageerada la heli karo ee ku saabsan imtixaanaadka Oregon iyo marka ay tahay in la isticmaalo.
- Tixgelinta sida sifooyinka imtixaanka gobolku ula mid tahay ama uga duwan yahay hawlaha qiimeynta ee fasalka.
  - Miyuu ilmuhu isticmaalaa qaababka helitaanka iyo qorshayaal la sii dejiyay oo loogu talagalay hawlaha fasalka kuwaasi oo loo oggol yahay hawlo la mid ah oo ku saabsan imtixaanka gobolka?
  - Miyay jiraan baahiyo kale oo wax laga qaban karo oo la isticmaalaya qaababka helitaanka ama qorshayaal la sii dejiyay oo aanan horeba loo bixin ama uusan isticmaalin ardaygu?
  - Waa maxay siyaasadaha khuseeya kuwaasi oo qaababka helitaanka iyo qorshayaal la sii dejiyay ay dhici karto in loo isticmaalo qiimeynta gobolka?
- Haddii ardaygu yahay mid federaal ahaan loo aqoonsaday in uu yahay Bartayaasha Ingiriiska oo qabo naafanimo, xaqiiji in taageerooyinku ay buuxiyaan dhammaan baahiyahiisa la xiriira barashada luqadda iyo saameynta naafanimadiisa labadaba.

**Kooxaha IEP waxay gacan ka geysan karaan xaqiijinta in natiijooyinka imtixaanka ka turjumayaan waxbarashada dhabta ah ee ardayga.**

- Isticmaalka tilmaamaha ka qayb qaadashada ee gobolka iyo wixii qalab ah ee degmadu leedahay si loo gaaro go'aanada ka qayb qaadashada.
- Xaqiijinta in ardayda qaadata Qiimeynta La Ballaariyay ee Oregon ay u qalmaan ka qayb qaadashada qiimeyntaasi.
- Bixinta qaababka helitaanka iyo qorshayaal la sii dejiyay.

**Waalidka ama mas'uulka waa in uu noqdo ka qayb qaate xog ogaal ah u ah go'aanada ka qayb qaadashada, kaasi oo tilmaamaya in ay fahamsan yihiin cawaajibka ka dhasha go'aanada.**

Go'aanada ku saabsan ka qayb qaadashada imtixaanku waxay saameyn ku yeelan karaan waxbarashada iyo noocyada dugsiga sare ka dib iyo fursadaha shaqo ee ay dhici karto in ay u furan yihiin ardayga.

Waa muhiim in waalidiinta iyo mas'uuliyiintu ay faham cad ka haystaan saameynta ay leeyihiin.

## LA XIRIIR

[Bogga Internet-ka ee Kooxda Qiimeynta ODE]

Fadlan wixii su'aalo ah, faallooyin ah, ama talooyinka u soo dir:

*ODE.AssessmentTeam@ode.oregon.gov*

*Ilaha Qiimeynta ODE*

*Qiimeynta Saxda ee loogu talagalay Ujeedada Saxda*

*Horumarinta Ilaha Qiimeynta*

*Ilaha Qiimeynta Ku meel gaarka ah*

*Buuga Helitaanka ee Oregon*

Xarunta Qaranka ee Natiijooyinka Waxbarashowww.nceo.info

NCEO waxaa lagu taageeraa heshiis iskaashi (H326G160001) oo ka dhexeeya University of Minnesota, Xarunta Qaranka ee Natiijooyinka Waxbarasho (NCEO) (#H326G160001) iyo Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka, Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada Baxnaaninta (OSERS), Xafiiska Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah. Waxyaabahani kama turjumayaan mowqifka ama siyaasadda Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka ama Xafiisyada ku dhex yaal. Mas'uulka Mashruuca David Egnor